DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES

# Isticmaalka ECIP-yada MN ee Barnaamijkaaga: Hababka loo maro Qaybta Waxbarashada Tilmaamaha Ka-qaybgalaha

(2 saacadood)

Cusbooneysiintii ugu dambeysay Janaayo 2026

---

Dhammaan agabka lagu sameeyay maalgelinta Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota, Adeegyada Daryeelka Carruurta waxaa xuquuqdooda leh oo lagu ilaaliyay Pub. L. No. 94-553, 90 Stat. 2541.

**Xuquuqaha daabacaadda iyo Xaddidaadaha Isticmaalka iyo Mas'uuliyadda**

Dhammaan manhajyada ay samaysay Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota, Adeegyada Daryeelka Carruurta, waxaa lagu sameeyay maalgelin dadweyne. Xuquuqda daabacaadda waa la ilaaliyaa, sidaas darteedna lama soo saari karo, lama beddeli karo, lama koobiyeyn karp, lama iibin karo, ama si kale looma qaybin karo **iyada oo aan la helin oggolaansho** qoraal ah oo ka timid Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota. Haddii ay adeegsadaan hay'ado kale oo tababar bixiya, *Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska iyo Adeegyada Daryeelka Carruurta* waa in lagu tilmaamaa inay tahay milkiilaha manhajka. Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota ma bixiso wax matalaad ah mana aqbalayso mas'uuliyad isticmaalkeeda ama natiijooyinkeeda.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir:

**Guudmarka Casharka**

**Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Dhallaanka, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)**

Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Minnesota ee Aagaga Mowduuca Xirfadlayaasha waxbarashada dhallaanka iyo Aagaga Maadada Isku Xirka Horumarinta Carruurta (Child Development Associate, CDA) waxay halkan ugu qoran yihiin si ay uga caawiyaan ka qaybgalayaasha inay fahmaan kartida, nuxurka, iyo maadooyinka looga hadlayo tababarka.

- Aagga Mawduuca KCF: I. Korriinka iyo Waxbarashada Caruurta
- Aagga Maadada CDA: VIII. Fahmidda mabaadi'da horumarka iyo waxbarashada carruurta

**Qeexitaanka Koorsada:** Barashada qaybta Hababka Waxbarashada laga bilaabo Heerarka Waxbarashada Ilmaha Yaryar ee Minnesota. Samee fikrado iyo hawlo gaar ah oo taageeri kara horumarinta hababka waxbarashada ee barnaamijka. Waxaa lagugula talinayaa inaad qaadato Hordhac ku saabsan ECIP-yada MN kahor intaadan qaadan koorsadaan.

**Ujeedooyinka Waxbarashada**
Inta tababarkan socdo, ka qaybgalayaashu waxay:

- Sharax ujeeddada iyo qaab-dhismeedka ECIP-yada
- Aqoonso tilmaamayaasha qaybta Hababka Waxbarashada ee fasalka hadda jira oo tilmaam sida loogu dhex dari karo hawlaha maalinlaha ah iyo hawlaha
- Samee qorshe ficil oo ay ku jiraan ugu yaraan hal istaraatiijiyad cusub oo lagu mideynayo qaybta Hababka Waxbarashada ee fasalka ama barnaamijka

## Hanaanka Kulanka

| Qaybta | Waqtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah | Xeeladaha Waxbaridda | Ujeedada Waxbarashada |
|---|---|---|---|---|
| **A** | 15 daqiiqo | Soo Dhawaynta/Hordhacyada<br>Dib-u-eegista Ujeedooyinka | Dooda Kooxda Ballaaran | |
| **B** | 30 daqiiqo | Ujeeddada ECIP-yada | Khudbo yar<br>Hawl Kooxeed Weyn | 1 |

| Qaybta | Waqtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah | Xeeladaha Waxbaridda | Ujeedada Waxbarashada |
|---|---|---|---|---|
| C | 15 daqiiqo | Dulmar guud oo ku saabsan Hababka Waxbarashada | Khudbo yar Dooda Kooxda Ballaaran | 1 |
| D | 45 daqiiqo | Ku Dhaqanka iyo Sameynta | Hawsha Koox Yar | 2 & 3 |
| E | 15 daqiiqo | Dib u Eegista/Xidhitaanka Ujeeddooyinka | Milicsiga shakhsi ahaaneed | |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | | | |

## 8 da Qaybood ee ECIPS

| Qaybta Domain-ka | Waxyaabaha kujira |
|---|---|
| **Hababka Waxbarashada** | Xiisaha, feejignaanta, male-awaalka, habaynta macluumaadka |
| **Farshaxanada** | barashadata iyo muujinta qaababka farshaxanka |
| **Luuqada iyo Akhriska iyo Qoraalka** | Dhageysiga, hadalka, akhriska, qorista |
| **Xisaabaadka** | Aqoonta tirada, cabbiraadda, qaababka, joomatari |
| **Kobaca Jireed** | Xirfadaha dhaqdhaqaaqa guud iyo kuwa wanaagsan, is-daryeelida |
| **Fikirka Sayniska** | barashada, abuurista, sharraxaada |
| **Kobaca Bulshanimada iyo Shucuurta** | Is-wacyigelinta, nidaaminta, xiriirka |
| **Nidaamyada Bulshada** | Aqoonsi, bulsho, waqti, deegaan, tiknoolajiyad |

### Waxyaabaha kujira Hababka Waxbarashada

- Xiisaha iyo xiisooyinka- Qaybtaan waxay ka tarjumaysaa xiisaha carruurta ee waayo-aragnimada cusub iyo xiisaha ay u qabaan inay wax ka bartaan adduunka ku xeeran.
- Feejignaanta - Feejignaantu waxay ku lug leedahay joogtaynta diirad saarista iyo sameynta go'aanno ula kac ah inta lagu jiro hawlaha waxbarashada.
- Male-awaal - Male-awaalka waxaa ka mid ah ku lug lahaanshaha ciyaar astaan, asal ahaan, iyo muujinta hal-abuurka.

- Habaynta iyo Isticmaalka Macluumaadka - Tani waxay ku lug leedahay maaraynta feejignaanta, fikirka dabacsan, xusuusta shaqada, iyo fahamka sababta iyo saameynta.

## Dhacdooyin - Ku habboon qayb ka mid ah

- Carruurtu waxay abuuraan sheekooyin faahfaahsan oo ay ku jiraan geesiyaal iyo caawiyaal bulsho.
- Inta lagu jiro ciyaarta bannaanka, ilmo ayaa arkaya dirxiga ciidda ku jira wuxuuna weydinayaa, 'Maxay ugu nool yihiin ciida?'
- Ilmuhu wuxuu xasuusanayaa tallaabooyinka lagu dhaqo gacmaha wuxuuna raacayaa tilmaamaha labada-tallaabo ah.
- Ilmuhu wuxuu ku jiraa ciyaar riwaayadeed muddo 8 daqiiqo ah, isagoo iska indha tiraya waxyaabaha mashquuliya.

## Istaraatiijiyad ama Hawl qayb kasta

- Xiisaha iyo xiisooyinka –
- Feejignaanta -
- Male-awaal -
- Habaynta iyo Isticmaalka Macluumaadka -

## Ilaha

Tilmaamayaasha Horumarka Dhallaanka: Nooca Heerarka Waxbarashada Ilmaha Yaryar ee Minnesota 2028 - https://dcyf.mn.gov/sites/default/files/2025-08/els-ecips-2028.pdf